DIYAARINTA RABBAAYADDA

TAKE WINTER BY STORM

Rabbaayaddu Diyaar ma u Tahay Cimilada Jiilaalka?

Sida aad ku samaysay agabka gurmadka qoyskaaga, ugu horraynta, ka fikir aasaaska nolosha rabbaayaddaada, gaar ahaan cuntada iyo biyaha. Ka fikir laba agab. Mid ku rid wax kasta oo adiga iyo rabaayaddaadu u baahan tihiin si aad u joogtaan halkiina. Ka kale waa inuu noqdaa qorsheaad qaadan karto haddii adiga iyo rabbaayaddaada aad u baahataan inaad baxdaan. Hubso inaad dib-u-eegto agabkaaga si joogto ah si aad u hubiso in waxa ku jiraa, gaar ahaan cuntada iyo daawadu, ay saafi yihiin.

Waxyaabaha Aasaasiga ee loo baahan yahay in aad geliso Agabka Diyaarinta Rabbaayaddaada

- ☐ Cuntada la siiyo rabbaayad kasta
  - Haayso ugu yaraan cunto saddex maalmood waxaadna gelisaa weel aan hawada soo gelin, biyahana celiya.
- ☐ Biyaha la siiyo rabbaayad kasta
  - U kaydi ugu yaraan biy ay saddex maalmood cabbi karaan rabbayaaddaada, oo dheeraad ku ah biyaha adiga iyo qoyskaagu u baahan tihiin (hal galaan biyaha uu maalintii cabbi ey wayn).
- ☐ Dawooyinka iyo kuwa hoos u dhiga walwalka/walaaca iyo tilmaamaha caafimaadka
  - U haay daawo dheeraad ah oo ka tirsan dawooyinka sida joogtada ah iyo waqtiyada walwalka la siiyo rabbaayaddaadawaxaadna gelisaa weel ka celiya biyaha. Waa in tilmaamaha la socdaan seedka bacdamaa ay dhici karto inqof kale uu caawinayaa rabbaayaddaada.
- ☐ Agabka gargaarka degdegga ah ee rabbaayadaha
  - Kala hadal dhakhtarkaaga xoolaha waxa ku habboon baahida caafimaad degdegga ee rabbaayaddaada. Agabka intiisa badan waa inuu ku jiraa xermada suufka, sharooto iyo maqas, dhayada antibayootiga, ka hortagga tixsiga iyo injirta, gacmo-gashadka blastiigga (latex) ah, alkahoolka loo yaqaan “isopropyl” iyo milanka cubada. Ku dar buugga tixraaca gargaarka degdegga rabbayaadda.
- ☐ Qool dheeraad ah oo leh sumadda aqoonsiga hadda, xadhko ama hoggaan
  - Rabbaayaddaadu waa inay xidhnaataa qool leh sumadda iyo aqoonsiga qofka leh mar kasta si loo garto. Raaci hoggaan dheeraad ah, qool iyo sumadda aqoonsiga waxaadna gelisaa agabka gurmadka rabbaayaddaada. Ka fikir inaad kala hadasho dhakhtarkaaga xayawaanka si loo siiyo aqoonsi joogto ah sida “chipka” la geliyo xoolaha, iyo in rabbaayaddaada la geliyo xogta laga baadho.
- ☐ Macluumaadka xidhiidhka iyo diiwaanka caafimaadka
  - Hayso hal nuqol ku qoran magaca iyo lambarka tilifoonka dhakhtarkaaga xayawaanka – oo ay weheliso cusbitaalada xayawaanka ee gurmadka ah, qafisyada dhawdhaw ee lagu haayo rabbaayadda iyo hooyga xoolaha – haayso mid, midka kalena waxaad gelisaa agabkaaga. Waxaad kuwan raacisaa nuqulada macluumaadka diiwaangalinta rabbaayaddaada, waraaqaha korsiga, warqadaha tallaalka iyo diiwaanka caafimaadka oo aad ku hayso jawaan bac ah oo nadiif ah ama weel biyuhu aanay galin kuna dar agabkaaga.
- ☐ Saxaarad ama shay kale oo lagu qaado rabbaayadda
  - Haddaad u baahato inaad dhaqaaqdaan marka xaaladda tahay gurmad, qaado rabbaayadahaaga iyo xayawaankaaga haddii ay suurtogal tahay. Xaalado badan, awoodaada aad u leedahay inaad sidaa samayso waxaa caawinaya haysashada saxaarad ama shayga lagu qaado neefka, marka uu adag yahay, fiican yahay, ammaan yahay, kuna habboon yahay qaadidda rabbaayaddaada. Qaadaha waa inuu weyn yahay kuna filan yahay rabbaayaddu inay sare-joogsato, soo jeesato iyo jiifsato. Hubso in magacaaga iyo macluumaadka lagaala xidhiidho ku yaalo qaadaha. Qaadeyaashu waxay kaloo ku fiican yahay waa meel ku wanaagsan haynta agabka gurmadka rabbaayaddaada.
- ☐ Alaabta nadaafadda
  - Ku dar xashka rabbaayadda iyo saxaarad xashka hadday habboon tahay, iyo sidoo kale wargeysyada, waraaqaha wax lagu masaxo, jawaanada bacda ee lagu rido qashinka iyo dareeraha kloriinka (chlorine bleach) ee guriga loogu talogalay si aad u gudato baahida nadaafadda rabbayaaddaada. Waxaad dareeraha lagu dilo jeermiga (bleach) u isticmaali kartaa la dagaalanka jeermiga (ku badhax sagaal qaybood oo biyo ah hal qayb oo ah dareeraha lagu dilo jeermiga). Haddaanad biyo karkarin karin, marka lagu jiro xaalad gurmad ah, waxaad sidoo kale isticmaali kartaa dareeraha lagu dilo jeermiga (bleach) si aad u nadiifiso biyaha. Ku dar 1/8 qaadada shaaha (ama 8 dhibic) oo ah dareeraha caadi ahaan loo isticmaalo guriga, aan lahayn udgoon, laguna dilo jeermiga (bleach), hal galaan oo kasta oo biyo ah, si fiican u walaaq, kuna dhaaf halkaas muddo 30 daqiiqo ka hor intaanad isticmaalin.
- ☐ Sawir adiga iyo rabbaayaddaada ah
  - Haddaad kala luntaan rabbaayaddaada xaaladda gurmadka ah, sawir adiga iyo rabbaayaddaada ah ayaa kaa caawin doono caddaynta milkiyadda taasoo ku kaalmeyn karta dadka kale inay kaa kaalmeeyaan aqoonsiga rabbaaddaada. Ku dar macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nooca xayawaanka, kooxda uu ka tirsan yahay, da’da, jinsiga, midabka iyo sifooyinka u gaarka ah.
- ☐ Baahi dheeraad ah oo u gaar ah iyo waxyaabaha u fiican ee la yaqaan
  - Waxaad agabkaaga gelisaa alaabto lagu cayaaro, cuntada wanaagsan, ama gogol khaas ah. Waxyaabaha la yaqaan waxay hoos u dhigi karaan walwalka rabbaayaddaada.

City of Seattle
Seattle City Light
Seattle Public Utilities
Seattle Department of Transportation
King County
StateFarm
KING COUNTY FLOOD CONTROL DISTRICT
Snohomish County Emergency Management
Pierce County Emergency Management

DIYAARINTA RABBAAYADDA

TAKE WINTER BY STORM

Samee Qorshaha Rabbaayadda

- ☐ Qorshee sidaad usoo ururin lahayd rabbayaadahaaga haddii ay dhacdo daadgurayn una saadaalin lahayd halka aad tagi doonto.
- ☐ Baaris ku samee talooyinka kale ee kuu banaan. Ogaaw ka hor inta ayna dhicin gurmadku tasiilaadka ka jira xaafadaada ama meel u dhaw goobta aad ku kulantaan ee aad heli kartaan adiga iyo rabbaayadahaagu. Talooyinka ku banaan waxaa ku jiri kara: huteelada ama muteelo ogol rabbaayadaha; tasiilaadka la dajiyo ilaa muddo sida qafisyada ama cusbitaalada xayawaanka kuwaasoo u dhaw xarunta daadguraynta.
- ☐ Haddaad haysato digniin ku filan in lala kulmi doono cimilo daran, sida daadad iman kara ama heerkuladao barafka fadhiista, hubso in rabbaayadaha gudaha la soo galiyo.
- ☐ Hadday qasab noqoto inaad baxdo, qaado rabbaayadahaaga hadday suurtogal tahay. Haddaad tagto hooyga dadwaynaha, maskaxda ku hay in ay dhici karto in xayawaankaaga aan loo oggolaan gudaha. Hore u diyaarso hooy ku habboon taasoo ku xidhan tirada iyo nooca xayawaanka aad daryeesho.
- ☐ Ka fikir qoyska ama asxaabta ogol inay ku qaabilaan adiga iyo rabbaayadahaaga marka lagu jiro xaaladaha gurmadka.

Soo Saar Siistemka Saaxiibka Dhaw

- ☐ La qorshee jaarka, asxaabta ama qaraabada si aad u hubiso inuu jiro qof daryeela ama daadgureeya rabbaayadaha haddaanad adigu awoodin. Qof u dhaw meesha rabbaayaddaadu joogto ayaa ugu habboon.
- ☐ Kala hadal saaxiibkaaga daryeelka rabbaayadda qorshayaashaada daadguraynta, waxaadna tustaa halka aad dhigtay agabka gurmadka rabbaayaddaada.
- ☐ Haayso macluumaadka lagala xidhiidho saaxiibkaaga daryeelka rabbaayadda markaad magaalada ka baxayso. Haddaad guriga ka maqan tahay marka cimilo darani dhacdo, wac saaxiibkaaga rabaayadda si aad u hubiso inay nabad qabaan gudahana joogaan.
- ☐ Qabso goobo cayiman (mid ku yaala jaarka kuugu soo dhaw, iyo mid kale oo kaa fog) halka aad ku kulmi doontaan marka lala kulmo xaaladda gurmadka.
- ☐ Haddii ay dhacdo inaysan jirin cid caawisa rabbaayaddaada, hel ama samee “Waxaa Gudaha ku Jira Rabbaayad” oo ah calaamado lagu dhajiyo laguna meeleeyo albaabada ama daaqadahaaga, oo ay kujirto macluumaad ku saabsan tirada iyo nooca rabbaayadaha gurigaaga jooga si aad ugu digto dab-damiyayaasha iyo shaqaalaha gurmadka. Ka fikir inaad ku qorto lambar tilifoon warqadaha lagu dhajiyo halka lagaala soo xariiri karo marka lala kulmo xaaladda gurmadka. (Iyo, haddii waqtiga oggolaado, xasuusnaw inaad warqadda lagu dhajiyo ku qorto erayada “Waa Lala Daadgureeyey Rabbaayadda”, haddii ay dhacdo in aad la qaxday rabbaayadda.)

Kala Hadal Dhakhtarka Rabbaayadahaaga Qorshaynta Gurmadka

Kala hadal noocyada waxyaabaha loo baahan inaad ku darto agabkaaga gurmadka gargaarka degdegga ah ee la siiyo rabbaayadda. Hel magacyada dhakhtarada xayawaanka ama cusbitaalada xayawaanka magaalooyinka kale ee ay dhici karto inaad ka raadiso hooyga ku meel gaadh ah. Waa inaad sidoo kale ka fikirtaa in aad dhakhtarkaaga kala hadashid aqoonsiga joogtada ah sida chibka la geliyo (micro-chipping), iyo in aad rabaayaddaada ka diiwaan gelisid rabbaaaddaada xogta laga baadho. Haddii mikro-chibka (micro-chip) la geliyo rabbaayaddaada, in aad casriyeysid macluumaadkaada xidhiidhka gurmadka lana geliyo liiska xogta leysku haleyn karo waxay kuu tahay lagama maarmaan inaad dib ula midawdo rabbaayaddaada.

Ururi macluumaadka xidhiidhka si loo helo daawaynta degdegga ee xoolaha.

Samee liiska macluumaadka xidhiidhka iyo ciwaanada wakaaladaha kantaroolka xayawaanka deegaanka sida Bulshada Naxariista (Humane Society) ama Bulshada Ka Hortagga Arxan Darrada loo Geysto Xayawaanka (Society for the Prevention of Cruelty to Animals), iyo cusbitaalada xayawaanka gurmadka. Hayso hal nuqul oo ka mid ah lambarrada tilifoonadaan midna ku rid agabka gurmadka rabbaayaddaada. Hel ama samee calaamadaha dhajinta (sticker) “Waxaa Gudaha ku Jira Rabbaayad” (“Pets Inside”) kuna dhaji albaabada ama daaqadahaaga, sida macluumaad ku saabsan tirada iyo nooca rabbaayadaha ee jooga gurigaaga si aad uga digto dab-damiyayaasha iyo shaqaalaha badbaadinta. Ka fikir inaad warqadda dhajinta ku qorto lambar tilifoon oo lagaalasoo xariiri karo marka lala kulmo xaaladda gurmadka. Iyo, haddii waqtiga oggolaado, xasuusnaw inaad warqadda dhajinta ku qorto erayada “Waxaa Lala Daadgureeyey Rabbaayadda”, haddaad la qaxday rabbaayadda.

Kuwa waqti geliya diyaarinta naftooda iyo rabbaadaha ayaa u dhaw inay la kulmaan dhib yar, walwal iyo walaac. Waqti qaado iminka si adiga iyo rabbaayaddaada diyaar u noqotaan.